

**YOUR VOICE,
YOUR CHOICE!**



**PARKS
& STREETS**



Codkaaga, Doorashadaada : Beeraha Nasashada & Waddooyinka

Mashaariicda ayaa diyaar u ah maalgelin haddii ay la kulmaan shuruudaha soo socda:

- Faa'iidayneysa dadweynaha
- Waa mashruuc jireed ama horumarinta raasamaalka jardiinooyinka ama waddooyinka Seattle
- Aanan kabadankaren \$150,000

Dhammaan mashaariicda waxay helayaan dib u eegis u-qalmitaanka Waaxda Gaadiidka Seattle (SDOT) ka hor inta aan la gaarin marxaladda Cod bixinta YVYC.

Kuusaska Qarka-jidka:

Fidinta dhinacyada-lugaynta waxa loo isticmaalaa soo gaabinta masaafada ka gudubka, iyo in marin loo bixiyo gaadiidka dadwaynaha iyo in la ballaadhiyo goobta ama aagagga lagu lugayn-karo. Waxa kaloo loo isticmaalaa in lagu qaboojiyo xawaaraha gaadiidka meesha maraya.



Calaamadaha Biglaynta leh (Flashing Beacons)

Nalal si fiican loo arko oo bilcaya, laguna rikibo isgoysyada oo dadka lugaynaya iyo kuwa baaskiilka wata gacmahooda ku maamulaan iyagoo riixaya batoon.



Waddo dhinac qiime jaban:

Waddo dhinaceedyo laga sameeyay waxyaabo qiime jaban, sida laami lagu shamiiteeyey ama lagu rinjiyeyey.



Marsho Inbiyeedi Qiime Jaban:

Shaagga ama lugta gaariga waxey ku istaageysaa halka kala soocda leexadka beerta iyo jidka.



Waddo ka gudub dhexdhexaad ah:

Jasiirado sare oo waddada dhexdeeda ah waxey u suurto gelineysaa dadka iney helaan meel nabad ah oo ay ku hakadaan inta ay iska eegayaan nuska haray iney gooyaan.




Burooyinka dhaqsiyaha iyo Miisaska:

Burooyinka ku fidsan jidka oo idil, waxaa loo isticmaalaa yareynta dhaqsiyaha baabuurta.



Leexadyada Geesaha waddooyinka:

Meelo daadeg ah oo laga sameeyo isgoysyada si loogu sahlo dadka kursiga socda saaran (wheelchair), kuwa lugaynaya iyo baaskiilleyda iney sahal u gudbaan.



Goobaabaha Taraafikada:

Wareegyada lagu sameeyo isgoysyada waddooyinka aan halbowlaha ahayn, waxa loogu talagalay ka-hortagga isku dhaca gaadiidka, iyo in la gaabiyo xawaaraha gaadiidka oo la horumariyo badbaadada baaskiilka iyo lugaynta.



Dariiyyada Shamiiteysan:

Dariiyyada shamiiteysan ee la lugeeyo, oo ka duwan kuwii caadigii ahaa ee lahaa waddo dhinac iyo biyo mareen.



**YOUR VOICE,
YOUR CHOICE!**



**PARKS
& STREETS**



Codkaaga, Doorashadaada : Beeraha Nasashada & Waddooyinka

Mashaariicda ayaa diyaar u ah maalgelin haddii ay la kulmaan shuruudaha soo socda:

- Faa'iidayneysa dadweynaha
- Waa mashruuc jireed ama horumarinta raasamaalka jardiinooyinka ama waddooyinka Seattle
- Aanan kabadankaren \$150,000

Dhammaan mashaariicda waxay helayaan dib-u-eegis xaq-u-yeelasho leh ee Seattle (SPR) ka hor inta aan la gaarin marxaladda Codeynta YVYC.

Miisaska la heli karo

Miisaska waxaa lagu siyaadin karaa si loo bixiyo meel ay fadhistaan dadka isticmaalaya qalabka lagu dhaq-dhaqaaqa.



Kuraasta parka

Kuraasta dhaadher ayaa lagu rakibi karaa si loo helo ikhtiyaarka fadhiga beeraha (Parks).




Galitaanka parka

Goobaha laga soo galo beerta-Park- ayaa la hormarinayaa, si ay u noqdaan kuwo la heli karo oo la isticmaali karo.



Hagaajinta raad

Jidadka jira ayaa dib loo cusbooney siin karayaa si ay u noqdaan kuwo si wanaagsan loo isticmaalo, oo ay ka mid yihiin salanka disha sare loogu gudbo jidka si loo helo in la dhaafo.



Dib-u-habeynta Qalabka

Qalabka jira, sida cirifka kubada kolayga, giraanta, iyo sidoo kale dayrka, waa la bedeli karaa, maxkamaddana waa la xakameyn karaa.



Hagaajin yar ee qaabka Dhismayaasha

Qaabka jira sida saldhigyada murtaaxa lagu yahay ama guryaha lagu hoydo ee xaaladahoodu qaab-dhismeedkeedu wanaagsan yahay, ayaa la heli karaa dhammeystir iyo hagaajin si loo harmariyo isticmaalkooda.



U galmind la'aan mashruuca Codkaaga iyo Doorashadaada

- Mashaariicda u baahan naqshad balaaran iyo/ama ka qeybgalka bulshada marxalada mashruuca
- Mashaariicda aan hoos imaan Waaxda Gaadiidka ee Seattle ee loo soo gaabiyo SDOT ama SPR
- Mashaariicda aan ku lug laheyn muuqa ama horumarinta dhaqaale, sida hirgalinta barnaamijyada cusub
- Mashruucyada horumarinta waddooyinka oo aad u ballaaran, sida marinada baaskiilada ama dhulka cagaaran ee xaafadda
- Beeraha ama parks ka cusub ama dib u cusbooneysiin balaaran ee beeraha, sida meesha eyda lagu xiro, dhulka cusub ee lagu ciyaaro ama garoomada kubada lagu ciyaaro
- Dhismo dhaqameed badan ee mashariicda geeska wadada lagu socdo
- Joogteynta mashruucyada dayactirka ee socda, sida alwaaxda cusub ee la shiiday khasharkooda, meelaha lagu ciyaaro iyo dayactirka dhulka laamiga ee biyahu godka ka jexeen
- Mashariicda iftiinka nalalka beeraha
- Mashaariicda aan haysan meel gaar ah (tusaale ahaan, "Ku rakibida nalalka bidh-bidh leh ee magaalada oo dhan")

Ma hubo in fikradaada mashruucu aad u qalantid iyo in kale? Haysashada fikrad mashruuc aan u qalmin YVYC, laakiin aadan hubin sida kale ee loo gaari karo? La xiriir Shaquan Smith at Shaquan.Smith@seattle.gov a ma 206.276.0089 si aad u heshid maclumaad.